



## War saxaafadeed Shaacin Degdeg ah

Jamce, Abriil 24, 2020

1437 Bannock St.  
Denver, CO 80202  
p: 720.865.7695  
[Jic\\_news@denvergov.org](mailto:jic_news@denvergov.org)

### Xogtii Ugu danbaysay ee Gurmada Magaalada iyo Degmada Denver ee ku aadan COVID-19 *Denver waxay balaarinaysaa amarka Joogista Guriga*

**Denver**– Duqa Magaalada Michael B. Hancock ayaa maanta ku dhawaaqay in Denver ay kordhinayso amarka waaxda caafimaadka dadwaynaha ee lagu amraayo dadka deegaanka inay guryahooda joogaa ilaa Maayo 8.

"Muhiimadeenu waa inaan dhawrno badqabka dadka deegaankeena aana badbaadino nolosha dadka," ayuu yiri Duqa magaalada Hancock. "Fayraskaan maaha mid tagaaya waana inaan u diyaar garoownaa saamaynada mudada fog. Anagoo kaashanayna tilmaanta gobalka, qaadanayna waqti dheeraad ah oon fikir iyo hal abuur ku keeno, waxaan doonaynaa inaan xaqiijino inaan haysano awooda saxda ah ee la socoshada dadka la jooga qofka cudurka qaba iyo baaritaanka dadka, iyo waqti aan tilmaan ku bixino taasoo ah in dadka deegaanka iyo bulshada ganacsigu ay u baahan yihiin dib u furista hawlhooda si amaan ah.

Kordhinta amarka joogista guriga waxay u sahlayso magaalada inay la shaqayso saraakiisha caafimaadka heer gobal ayna sii wado diyaarinta tilmaan iyo xeerar gaar ah oo loo abuuraayo ganacsiyada iyo xarumaha bulshada. Dib u furida ganacsiyada kadib Maayo 8 ayaa sidoo kale u sahlaya magaalada inay:

- Aqoonsato ayna tababar isdhaaf ah siiso shaqaalaha si loo dhaqan galiyo maaraynta Kiiska COVID-19, ayna ku jiraan la socoshada dadka la jooga dadka jiran iyo la socoshada xaalkooda, dhamaystirka baaritaanka dadka jiran iyo fulinta amarada karantiilka iyo go'doominta.
- INAY BALaariso ayna kor u qaado baarista ayadoo yoolku yahay in la sameeyo 1,000 baaritaan maalin kasta.
- Inay hesho qalabka difaaca shaqsigu oo dheeraad ah (PPE)
- Inay kordhiso ayna kor u qaado xariirada u dhaxeeya magaalada iyo ganacsiyada ee ku aadan tilmaamaha iyo xeerarka dib u furida ganacsiyada ayadoo la raacaayo talaabooyinka ugu haboon caafimaadka dadwaynaha.
- Inay siiso ganacsiyada fursad ay ugu diyaar garoobaan dib u furida ayagoo raacaaya xeelado ay dajiyeen Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Bii'ada iyo sidoo kale xeerarka ganacsiyada qudhooda u dagsan.

Ayadoo degmadu u diyaar garoobayso dib u furida qaybaha kaladuwan ee hawlaha bulshada, Xafiiska Qareenka Magaalada Denver ayaa furay kooxdiiisa gurmada. Haddii xubnaha bulshadu su'aalo ka qabaan xanibaadaha COVID-19 ee magaalada iyo ilaha ay heli karaa, fadlan waca 311 ama iimeel udir [CAOResponseTeam@denvergov.org](mailto:CAOResponseTeam@denvergov.org).

Kooxda gurmada ee Xafiiska Qareenka Magaalada ma bixin karaan talo sharci oo lasiiyo bulshada, laakiin waxay awoodaan inay tilmaan ka baxshaan qaabka ugu haboon ee ay awoodaan.

# # #